

Maxaan Filayaa?

Xarumaha Baxnaaninta Degaanka (RHCs) waa xarumo daryeel dhexe oo la xaqiijiyey kuwaas oo adeegyada baxnaaninta iyo caafimaadka ee gaarka iyo kuwo ballaaranba u fidiya shakhsiyaadka la ildaran naafonimo xaga caqliga ah iyo mid koritaan, si kor loogu qaado xaaladooda shaqeynta iyo madax-bannaanida sidaa daraadeed ayaa waxaa laga yaabaa in ay dib ugu noqdaan bulshadooda. Yoolasha ka bixinta ayaa laga munaaqashoodaa ka hor inta aan la geyn xarumaha waxaanna lagu saleeyaa baahiyada taageerada la aqoonsadey ee macmiilka ee ka hor istaagaya in ay ku dhex noolaadaan bulshooyinkooda.

Inta uu qaadanyo adeegyada ICF/IID, koox ka kooban khubbarro iyo xirfadlayaal (IDT) kala duwan ayaa macmiilka kala shaqeyn doonta diyaarinta Qorshaha Baxnaaninta Shakhsiga (IHP) oo ay ka mid tahay sharraxaadda faahfaahsan ee baahiyada macmiilka, taageerooyinka iyo dookhyo ku taageeraya u wareegidda deegaan waxyar xaddidan. Macaamiisha iyo wakiiladooda sharciga ah waa qayb muhiim ah oo ka mid ah kooxda IDT.

Maareeyaha Kheyraadka Kiiskaaga DDA ayaa sidoo kale noqon doonna xubin muhiim ah oo ka tirsan kooxdaada. Waxay bixin doonnaan taageero iyo isu-duwid ka hor iyo inta lagu guda jiro hannaanka geynta/gelinta xarunta waxayna ku sii lug yeellan doonnaan inta lagu guda jiro kala-guurkaaga si ay gacan uga geystaan isku-dubaridka adeegyada bulshada ku saleysan, sida qayb ka mid ah qorsheyntaada ka-bixidda.



DSHS 22-1885 SM (3/22) Somali



Xarumaha Baxnaaninta Degaanka ah Xarumaha Daryeelka Dhexe



Waa maxay adeegyada Xarunta Daryeelka Dhexe ee loogu talagalay Shakhsiyaadka Naafonimada Xagga Caqliga ah leh (ICF/IID)?

Maamulka Naafonimada Koritaanka (DDA) ee DSHS wuxuu ka shaqeeyaa saddex (3) RHCs oo federaal ahaan loo xaqiijiyey si ay ugu fidiyaan taageerooyin caafimaad iyo mid baxnaanin shakhsiyaadka leh naafonimada xagga caqliga iyo kuwa koritaanka. Xaqiijinta federaalka waxaa loola jeedaa in Xarumaha loogu talagalay Adeegyada Medicare iyo Medicaid in uu u degsan yahay jaangooyooyin gaar ah, xeerka nidaamiyayaasha federaalka (C.F.R), oo RHC-yada ay tahay in ay ka soo baxaan.

Gelidda xarunta waa ku-meelgaar, sababta oo ah hadafku waa in macmiilka uu adeegyada ku qaato bulshada dhexdeeda marka ay ka soo baxaan yoolkooda baxnaaninta.

Adeegyada ICF/IID ee gobolka Washington waxaa bixiya RHCs-yo uu maamulo gobolka: Iskuulka Fircrest ee ku yaalla Shoreline, Tuullada Lakeland Village ee ku taalla Spokane iyo Iskuulka Rainier ee ku yaalla Buckley.

Sideen ku helaa adeegyada ICF/IID?

Si uu xaq ugu yeesho adeegyada ICF/IID ee ku meelgaarka ah, macmiilka waa in uu ka soo baxaa shuruudaha xaq-u-yeelashada ICF/IID iyo shuruudaha xaq-u-yeelashada RHC sida ku qoran siyaasadda DDA ee 17.02.

Xaq-u-yeelashada adeegga ICF/IID:

- Xaq-u-yeelashada DDA u go'aamisey si waafaqsan Cutubka 388-823 WAC;
- Xaq-u-yeelashada Medicaid u go'aamisey si waafaqsan Madaxa 182 WAC;
- Macmiilka da'diisu ay tahay 21 sano jir ama ka weyn, haddii ay da'daadu u dhaxeeyo 16-20; adeegyo bulsho oo si habboon u haqabtiri kara baahiyadaada lama heli karo; iyo
- Ka soo baxo heerka daryeelka ICF/IID sida lagu go'aamiyey qiimeynta DDA

Xaq-u-yeelashada RHC:

- Macmiilku uu leeyahay baahi caafimaad iyo mid daryeel oo aysan iminka haqabtiri karin adeegyada baxnaaninta degaanka;
- Uusan u baahnayn daaweyn bukaan-jiif oo uu u qorey xirfadlaha daaweynaya macmiilka;
- Waa in aan loo xirin dembi, xirnayn aysanna ku socon dacwo madani ah; iyo
- Waa in qiimeynta horudhaca ah ee shaqaalaha RHC ay go'aamisaa in macmiilka uu ka soo baxey shuruudaha daaweynta firfircoon

Waxaad la xiriiri kartaa Maareeyaha Kheyraadka Kiiska ee adeegyada gudaha ee DDA haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama si aad u codsato adeegyada ICF/IID.

Waa maxay daaweynta firfircoon?

Daaweynta firfircoon sida lagu qeexay xeerka 42 C.F.R. 483.440(a) (1)(2), macnaheedu waa fulinta joogtada ah, degdegga ah ee barnaamijka tababarka guud ee gaarka ah, daaweynta, adeegyada caafimaadka iyo adeegyada la xiriira ee ku aaddan:

- Helidda hab-dhaqannada lagama maarmaanka u ah in macmiilka ugu shaqeeyo aayo ka-tashi iyo madax-bannaani intii suurtagal ah; iyo
- Ka-hortagga ama hoos u dhigidda dib-u-gurashada ama luminta xaaladda shaqeynta ee ugu fiican.

Daaweynta firfircoon ka mid ma ahan adeegyada lagu joogteynayo macaamiisha guud ahaan madax-bannaan kuwaas oo awooda in ay shaqeeyaan iyagoo helaya kormeer yar ama la'aanta barnaamij daaweyn firfircoon oo joogto ah.

Gelidda Xarun ka hor, qayb ka mid ah qiimeynta horudhaca ah ee RHC waa go'aaminta in macmiilka uu oggol yahay in uu ka qaybgalo, uu u baahan yahay ama ay suuragal tahay in uu ka faa'iido barnaamijka daaweynta firfircoon ee joogtada ah.

Maxaa loola jeedaa gelidda xarunta ku-meelgaarka ah?

Adeegyada ICF/IID waa ku-meelgaar. Macmiilka xaq u leh wuxuu heli karaa adeegyada ICF/IID ilaa shuruudahooda ka bixidda lagaga soo baxo ama aysan ka faa'iideyn, ama aysan doonayn in ay ka qaybgalaan, daaweynta firfircoon. Gelidda ICF/IID ee muddada-dheer ama joogtada ah lama heli karo.

Xeer-nidaamyada federaalka waxay uga baahan yihiin shakhsiyaadka in ay ka baxaan ICF marka:

1. Xarunta aysan haqabtireyn baahiyada macmiilka;
2. Macmiilka uusan u baahnayn daaweynta ICF;
3. Macmiilka uu doorto in uu meel kale dego; ama
4. Haddii la go'aamiyo in heer kale oo adeeg ah ama xaalad nololeed ay aad faa'iido ugu yeellan karto macmiilka

